## Maxaa loola jeedaa erayga “lagu hayo”?

“Lagu hayo” waxaa loola jeedaa qof lagu hayo xarumaha ICE. Nidaamka ODLS waxaa laga heli karaa xarunta uu qofku ku xiran yahay iyo macluumaad ku saabsan sida lagu soo booqan karo. Nidaamka ODLS waxaa kale oo laga heli karaa xafiiska DRO ee mas’uulka dacwadda qofka.

## Yaan laga heli karin ODLS?




Nidaamka ODLS lagama heli karo macluumaadka halka ay ku sugan yihiin dhamaan dadka la xiray. Arrimo la xiriira amaanka, nabadgelyada iyo hab u gaar ah nidaamka ay hay’addu u shaqeyso ayaa u diidaya in la soo bandhigo macluumaadka qof kasta lagu soo bandhigo nidaamka ODLS. Tusaale ahaan, Ilmaha da’da yar (dadka ay da’doodu ka yar tahay 18 sano) macluumaadkooda lagama heli karo nidaamkan. Sidoo kale, shaqsiyaadka qaarkood waxaa suurto gal ah in aan la gelin macluumaadkooda nidaamka ODLS marka la soo xiro durbadiiba, taasoo ku xiran Inta hawlahooda la dhameynayo iyo waqtiga la gelinayo kombiyuutarka.

## Waan helay qofkii aan raadinayey. Maxaan yeelaa markaan?

Haddii aad hesho qofkii la hayey oo aad raadineysay, waxa aad la xiriii kartaa halka uu ku xiran yahay adiga oo adeegsanaya macluumaadka aad haysato si aad u xaqiijiso in qofkaa weli la sii hayo maadaama macluumaaka ODLA uu yahay mid isbedela sideedi saac ee kasta.

Haddii aad go’aansato in aad soo booqato qofka la xiray, waa in aad la xiriirtaa goobta uu ku xiran yahay ka hor inta aadan aadin si aad u sii xaqiijiso saacadaha booqashada iyo nidaamka u yaal. Waxaa kale oo lagaa doonayaa in aad keento aqoonsi ay dawladdu bixisey oo sawir leh haddii aad booqaneyso xarunta.

## Weli waxa aan qabaa su’aalo dheeraad ah. Xagee ayaan jawaab ka helayaa?

Waxaa jira su’aalo inta badan la is weydiiyo iyo jawaabahooda (FAQs) oo aad ka heli karto barta internetka ee ODLS: https://locator.ice.gov/odls/#/about.

U.S. Immigration and Customs Enforcement





*Sidee ayaan ku Ogaan karaa halka uu ku xiran yahay qof ku qoran xarumaha Waaxda Socdaalka?*

# Nidaamka Lagu Ogaado Halka Ay Ku Xiran Yihiin Dadka Xiran


**www.ice.gov/locator**

U.S. Immigration and Customs Enforcement

## Muxuu yahay Nidaamka Lagu Ogaado Halka Qofku Xiran yahay?

Habka laga heli karo barta internetka ee lagu ogaado halka uu qofku ku xiran yahay (ODLS) waa midka dadka oo dhan u furan isla markaana xubnaha qoyska, wakiilada sharciga ah (qareenada) iyo dadweynuhuba, ay ku ogaan karaan halka uu ku sugan yahay qofka lagu hiray ICE. Si aad u adeegsato ODLS, fadlan soo booqo http://www.ice.gov/locator.

Kolkii hore, sida kaliya ee lagu ogaan jirey waxa ay ahayd iyada oo lala soo xiriiro saraakiisha Xafiiska Dhaqangelinta ICE iyo Ka Saaridda (ERO). Dib u habeynta lagu sameynayo, ICE waxa ay dhaqan gelisey ODLS si xubnaha qoyska iyo qareenada ay si fudud u ogaadaan halka qofku ku xiran yahay, 24ka saac, todobada cisho ee todobaadka. Nidaamkan waxa lagu heli karaa afka Isbaanishka, iyo todoba luqadood oo kale.




## Sidee ayaa Xubnaha Qoyska iyo Qareenadu uga baaran nidaamkan dadka u xiran ICE?

Habka ODLS waxa aad wax kaga baaran kartaan laba siyaabood:

**1.Lambarka Qofka ee socdaalka (A-Lambar) iyo Waddanka uu u dhashay.**

Sida ugu haboon ee nidaamka wax looga baarto waa lamabarka socdaalka ee qofkii la xiray (A-lambarka) iyo waddanka uu u dhashay. A-lambarka waa lambar ka kooban sagaal lambar kaas oo ah lambar la siiyo qof kasta oo codsada waxyaabaha macaashka ee laga helo waaxda socdaalka. Sagaalka lambar waxaa suurto gal ah in uu eber ka biloowdo. A-Lambarku waa lambar gaar ah qof kastana kiisu gaar yahay. A-Lambarka waxaa laga heli karaa dhinaca kore ee midigta ee Ogeysiiska Codsadaha Loogu Yeeray (NTA), Foomka I-862. Marka aad geliso A-Lambarka, waxa lagaa doonayaa in aad geliso waddanka uu u dhashay qofka, ama

**2.Magaca awoowaha, Magaca qofka, iyo waddanka uu u dhashay.**

Haddii aadan garaneyn A-lambarka qofka la xiray, waxa aad ku raadin kartaa adiga oo adeegsanaya magaca qofka iyo kan awoowaha qofka iyo waddanka uu u dhashay. Haddii aadan ku guuleysan in sidaa aad ku ogaato, waxa aad tixgelisaa in magaca qofka aad siyaabo kala duwan u geliso.




## Miyay waa waajib igu tahay in aan garanayo sida saxa ah ee loo qoro magaca qofka la xiray?

Haa. Nidaamka ODLS waa mid ku shaqeeya sida saxa ah ee magacu u qoran yahay. Taas macnaheedu waxaa weeye si aad u ogaato halka qofku ku xiran yahay waa in aad gelisaa A-lambarka saxa ah ee qofka ama magaca koowaad ama magaca sadexaad ee qofka la xidhay sida uu ugu qoran yahay warqadaha ama warqadaha lagu xirey. Haddii aad si khalad ah aad u geliso macluumaadka qofka, nidaamku ma ku siinayo jawaab ama natiijo sax ah.

Tusaale ahaan adiga oo raadinaya “Robert Smith” ma heleysid jawaab sax ah haddii aad u geliso “Robert Smyth” ama “Bob Smith.”

Marka aad baaritaanka ku sameyso A-Lambarka, macuumaadka hal qof oo kaliya ayaa kuu soo baxaya, waayo qof kasta waxa uu leeyahay A-Lambar u gaar ah. Hase yeeshee, marka aad adeegsato magaca qofka, waxa suurto gal ah in ay macluumaadka dad badan kuu soo baxaan haddii ay wadaagaan magaca iyo wadanka ay u dhasheen. Marka uu macluumaad fara badan kuu soo baxo, fiiri sanadka dhalashada qofka, kaas oo ka dhex muuqanaya jawaabta kuu soo baxday, ama ku baar A-Lambarka qofka xiran.

## Maxaan yeelayaa haddii aanan weli waxba ku ogaan karin baaritaankaas?

Nidaamka ODLS waxaa laga heli karaa oo kaliya macluumaadka dadka lagu hayo xarumaha. Haddii aadan nidaamka ODLS ku ogaan karin dadka lagu hayo, fadlan la xiriir xafiisyada ku shaqada leh ee ICE ERO. Barta Internetka ee https://www.ice.gov/contact/field-offices,ayaad ka heli kartaa magacyada xafiisyada iyo halka lagala xiriiro xafiisyada ERO, ka dibna ku shaandhee oo u kala saar xafiiska hawl galka iyo ka saarista.